Saaxiibka Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Waa’il bin Xujr

وائل بن حجر رضي الله عنه

Aabaha dhalay qabiilka soomaaliyeed ee Reer Faqay

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan

بسم الله الرحمن الرحيم

والحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون

Saaxiibka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Waa'il bin Xujr وائل بن حجر

Al Qasdhalaani**القسطلاني** iyo Al Zarqaanii**الزرقاني** waxay wariyeen qoralkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay saxaabiga Waa'il bin Xujr **وائل بن حجر\,** una dhashay qabiilka yamaneed ee Ximyar**حمير** uuna boqorradooda ka mid ahaa, degina jiray Xadramuut**حضرموت** ee dalka Yaman**يمن.** Wafdi ahaan ayuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ugu yimid wuxuuna waydiistay inuu dhul u gooyo, wuuna u gooyay, markaasuu wuxuu ku daray Mucaawiyah bin Abii Sufyaan**معاوية بن أبي سفيان** si uu dhulkaas gacanta ugu geliyo.

Markay is raaceen ayuu Mucaawiyah**معاوية** wuxuu Waa'il bin Xujr**وائل بن حجر** ku yiri: "ratigaad saaran tahay xagga dambe iga fariisi."
Markaasuu wuxuu ugu jawaabay isagoo ku yiri:
"kama mid tihid kuwa boqorrada dhabarkooda la fariisiyo."

Markaasuu markuu Mucaawiyah**معاوية** noqday khaliifka iyo boqorka dawladda islaamka ayaa waxaa usoo wafdiyay oo u yimid Waa'il bin Xujr**وائل بن حجر** . Markaasuu Mucaawiyah**معاوية** qaabilay oo karaameeyey.

Markaasuu Waa'il**وائل** wuxuu oran jiray:
"waxaan jeclaan lahaa inaan maalintuu i waydiistay inaan dhabarkayga fariisiyo aan hortayda fariisiyo."

Abuu Nucaym**أبونعيم** wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uu minbarkiisa isagoo saaran oo Waa'ilna**وائل** soo saaray, uuna dhul u gooyay, qoraalna uu u dhigay, uuna yiri:

"هذا وائل سيد الأقيال."

"haathaa Waa'il sayyidu al aqyaali"
oo macnihiisu yahay:

"kanu waa Waa'il**وائل** oo ah madaxa boqorrada."
Waa'il**وائل** kaddibna wuxuu degay Al Kuufah**الكوفة** ee arliga Ciraaq**عراق.**

Ibnu Thafar**إبن ظفر** wuxuu yiri:
"Waa'il bin Xujr**وائل بن حجر** wuxuu lahaan jiray sanam dhagax qiimo badan ka samysan oo uu caabudi jiray una sujuudi jiray. Markaasuu maalin duhurkii agtiisa seexday markaasuu wuxuu maqlay cod laga baqo oo hurdadii kasoo kiciyay. Markaasuu soo kacay oo uu u yimid, una sujuuday. Markaasuu wuxuu maqlay haatif**هاتف** oranaya:

وعجبا لوائل بن حجر/يخال يدري وهو ليس يدري
ماذا ترجى من نحيت صخر/ليس بذي عرف ولا ذي نكر
ولا بذي نفع ولا ذي ضر/لو كان ذا حجر أطاع أمري

1. Waa cajaban li Waa'il bin Xujr/yukhaalu yadrii wa huwa laysa yadrii
2. Maa thaa tarjaa min naxiiti sakhrin/laysa bi thii curfin wa laa thii nukrin
3. Wa laa bi thii nafcin wa laa thii darrin/law kaana thaa xijrin adhaaca amrii.

Saddexda tixood macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaa la yaab leh xaaladda Waa'il bin Xujr**وائل بن حجر** /wuxuu moodayaa inuu wax ogyahay waxna ma oga.
2. Maxaad ka rajaynaysaa dhagax la qoray/aan waxna yeelin waxna diidin.
3. Wax nafci ahna aan lahayn waxna aan dhibi karin/hadduu caqlilow ahaan lahaa amarkayguu yeeli lahaa Waa'il**وائل.**

Markaasuu Waa'il**وائل .** madixiisa kor u qaaday oo uu yiri:
"maxaad i amraysaa inaan falo?"
Markaasuu wuxuu yiri:

1.ارحل إلى يثرب ذات النخل \\ وسر إليها سير مستقل
2.فدن بدين الصائم المصلي \\ محمدا الرسول خير الرشل

1. Irxal ilaa Yathrib thaata al nakhli/wa sir ilayhaa sayra mustaqillin
2. Fa dan bi diini Al Ssaa'imi al musalli/Muxammadan Al Rrasuuli khayra Al Rrusuli.

Labadaas tixood macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaad aadda Yathrib**يثرب** midda geedaha timirta badan/waxaadna u safartaa safar aad u madax bannaan tahay.
2. Waxaadna ka diin yeelataa oo aad gashaa diinta midka soonka badan oo salaadda badan/Muxammad**محمد** midka Rasuulka ah oo Rusushoo idilna ugu khayr badan.

Markuu intaas yiri ayuu sanamku xagga wajigiisa dhulka ugu soo dhacay.

Markaasuu Waa'il**وائل .** intuu u tegay uu budo ka dhigay oo burburiyay, kaddibna uu dhaqaaqay ilaa uu Al Madiinah**المدينة** ka yimid, uuna masjidka soo galay.

Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u yeeray oo uu go'iisa dhulka ugu fidiyay uuna kula dul fariistay. Kaddibna Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuuna yiri:

"أيها الناس هذا وائل ين حجر، أتاكم من أرض بعيدة، راغبا في الإسلام."

“ayyuhaa al nnasu haathaa Waa’ilu bin Xujri, ataakum min ardin baciidatin, raaghiban fii al islaami”
oo macnihiisu yahay:

“dadow kanu waa Waa’il bin Xujr**وائل بن حجر** oo idiinka yimid arli fog isagoo diinta islaamka doonaya.”
Markaasuu wuxuu yiri:
“Rasuulka Ilaahayow soo bixintaada ayaa isoo gaartay anigoo boqortooyo wayn leh, markaasaan kasoo tegay, waxaanna ka doortay diinta Ilaahay.”
Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

"صدقت، اللهم بارك في وائل وولده وولد ولده."

“sadaqta, Allaahumma baarik fii Waa’ilin wa waladihi wa walada waladihi” oo macnihiisu yahay: “Ilaahayow Waa’il iyo caruurtiisa barakee iyo caruurta caruurtiisaba.”

Qoraalka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Waa’il bin Xujr

Qoraalkaas uu Waa’il bin Xujr**وائل بن حجر** u dhigay wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Caala Aalihi Wa Sallam ku xusay zakada laga doonayo oo qaarkeed sidaan yahay:

"في التبيعة شاة لا مقورة الألياط ولا ضناك، وانطوا الثبجة وفي السيوب الخمس، ومن زنا مم بكر فاصقعوه مائة واستوفضوه عاما، ومن زنا مم ثيب فدرجوه بالأداميم، ولا توسم في الدين، ولا غمة في فرائض الله تعالى، وكل مشرك حرام ووائل بن حجر يترفل على أقيال."

“fii al tabicati shaatun laa muqawwarata al alyaadhi wa laa dinaaka, wa andhuu al thabajata wa fii al suyuubi al khumusu, wa man zanaa mima bikri fa asqacuuhu mi’atan wa istawfiduuhu caaman, wa man zanaa mima thayyibin fa darrijuuhu bi al adaamiimi, wa laa tuusiim fi al ddiini, wa laa ghummata fii faraa’idi Allaahi Tacaalaa, wa kullu muskarin xaraamun wa Waa’ilu bin Xujri yataraffalu calaa aqyaali.”

Qoraalka oo ku dhigan af Carabiga reer Yaman**يمن** oo ka duwan midka Quraysh**قريش** macnihiisu waxaa weeyey:

“afartankii neef oo ari ahba waxaa zako ahaan waajib ku ah in laga bixiyo neef ari ah oo aan caato badan ahayn, aadna aan u buurnayn, waxaadse zako ahaan u bixisaan xoolaha meel dhexaadka ah aan ahayn kuwa xoolaha ugu fiican iyo kuwa ugu liita toona. Dahabka iyo kanziga isagoo dhulka ku duugan aad heshaanna, oo ay quruun hore oo islaamka ka horreeyey ku duugeen, zako ahaan waxaad u bixisaan khumus oo ah inta shan meelood loo qaybiyo ayaa meel la bixinayaa (waana boqolkiiba labaatan).

Qofka zinaysta oo aan wali guur sad ku qaadan garaaca oo waxaad ku dhufataan boqol ulood ama karbaash oo jirkiisa iyo haraggiisa lagu dhufanayo hal sanana dalkiisa ka musaafiriya. Qofka guur hore sad ugu qaatay oo zinaystana dhagax la dhaca ilaa uu ka dhinto hana ka gaabina meel marinta diinta iyo xuduudda Ilaahay. Wuxuu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** idinku waajibiyayna way cad yihiin ee si caddaan ah u meel mariya, sida bixinta zakada oo kale iyo meel marinta xuduuddaba. Waa'il bin Xujr**وائل بن حجر** waa madaxiinna wayn iyo odaygiinna, zakadiinnana isaga u dhiiba."

Waa'il bin Xujr**وائل بن حجر** wuxuu ku abtirsadaa boqorka magaciisu yahay Saba'**سبأ** oo Suuradda Quraanka ah ee Suuratu Saba' **سبأ** lagu magacaabay iyo boqorka isaguna Quraanka ku xusan ee Tubbac**تبع.**
Waxaa ayaguna Ximyar**حمير** ku abtirsada amxaarada, oo amxaaro waa ximyar**حمير** oo xuruufteeda la is dhaafiyay.

Al Shariif Caydaruus Al Shariif Calii Al Caydaruus

Shariif Caydaruus, Allaha u naxariistee, wuxuu kitaabkiisa Bughyatu Al Aamaali fii taariikhi Al Ssumaali **بغية الآمال في تاريخ الصومال** laguna daabacay Muqdisho laba iyo tobanka bisha Shawwaal**شوال** kun saddex boqol afar iyo toddobaatanka Hijriga una dhiganta afarta Juunyo kun sagaal boqol shan iyo konton miilaadiga, wuxuu bogga laba iyo afartan ku wariyay inay qaar ka mid ah qabaa'il carab ah ay Muqdisho yimaadeen, wuxuuna yiri, anigaana af carabiguu ku dhigay kasoo tarjumay:

"sanadka boqol sagaal iyo afartan hijriga qabaa'il carbeed ayaa ka yimid Sanca iyo Ciraaq iyo ghayrkoodba ee dalalka kale waxayna yimaadeen Muqdisho. Waxayna ahaayeen afartan qabiil oo mid dhimman. Waxaa ka mid ahaa: laba iyo toban ka tirsan **جدعتى** Judcataa (oo ah Shaashiyiinta –waana Shaanshida), iyo lix ka tirsan **العقبى**Al Cuqbaa (Duruqbah), iyo saddex ka tirsan **العفيفي** Al Cafiifii (Gudmane), iyo lix ka tirsan **الإسماعيلي** Al Ismaaciilii, iyo laba iyo toban ka tirsan **القحطانيين** Qaxdhaaniyiinta (Aali Faqiih-Reer Faqay) oo ka yimid beledka Al Maqraa**مقرى** ee Sanca**صنعاء** oo ah (waana reer Faqayga) ubadka Sulaymaan bin Yacquub bin Qaxdhaan bin Waa'il bin Xujr**سليمان بن يعقوب بن قحطان بن وائل بن حجر** Saxaabiga wafdi ahaan ugu yimid Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam sanadka toddobaad ee Hijrada; waxaana la yiri inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam asxaabtiisa ugu bishaareeyey intuusan u imaan ka hor, uuna yiri:

"يأتيكم بقية أبناء الملوك."

Xadiithka macnihiisuna waxaa weeye:

"Waxaa idiin imaanaya kuwa ka haray dhasha boqorrada."

Markuu yimidna, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuu soo dhoweeyey, agtiisa ayuuna fariisiyay, wuxuuna dhulka u goglay go'iisa, wuxuuna ugu duceeyey inuu Ilaahay caruurtiisa barakeeyo."

Reer Faqay waxay hayaan qaallinnimada Muqdisho iyo guntinta nikaaxa, kaddib markay sidaas ku heshiiyeen dhammaan qabaa'ilka aan kor ku soo sheegnay. Inay ayagu nikaaxa guntaanna waa waxay ayagu is ka dhaxlaan oo aabayaalku awoowayaalkay ka dhaxlaan.
Sanadkaas dabadiisna waxaa Muqdisho yimid qabiilka **آل المخزوم** Aali Al Makhzuumii (waana Reer Sheekh) (ahna dhasha Al Shaykhu Cabdu Al Caziiz bin Muxammad bin Abii Bakr Al Makhzuumii**الشيخ عبد العزيز بن محمد أبي بكر المخزومي**, ahna midka kasoo haajaray wadankiisa **عرقط** Carqadh (sidaasaan u malaynayaa oo farta carabiga ah meshaan si fiican uma muuqato: Xasanwali) waana kan iska leh minaaradda ku taalla dekadda Muqdisho agteeda."
Waa intaas warkaan kasoo qaadannay Shariif Caydaruus, Allaha u naxariistee.

Saba'سبأ

Al Tarmithii**الترمذي** wuxuu Farwatu bin Musayk**فروة بن مسيك** ka wariyay in markuu Ilaahay Saba'**سبأ** wixii uu kusoo dejiyay uu Quraan kasoo dejiyay (oo ahaa burburka biyo xireenkii Carim**عرم** iyo dalkoodiiba), ayuu nin wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Saba'**سبأ** waa maxay: ma haweeneybaa mase arli?"
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ليس بامرأة ولا أرض، ولكنه رجل ولد عشرة من العرب، فتيمن منهم ستة، وتشأم أربعة. فأما الذين تشأموا: فلخم، وجذام، وعميلة، وغسان. وأما الذين تيمنوا فالأزد، والأشعرون، وحمير، ومذحج، وكندة, وأنمار."

"Laysa bi imra'atin wa laa ardin, wa laakinnahu rajulun walada cashratan mina Al Carabi, fa tayammana minhum sitatun, wa tashaa'ama arbacatun. Fa ammaa allathiina tashaa'amuu: fa lakhmun, wa Juthaam, wa Caamilatu, wa Ghassaan. Wa ammaa allathiina tayaamanuu fa Al Azdu, wa Al Ashcaruuna, wa Ximyar, wa Mathxij, wa Kindatu, wa Anmaar".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"(Saba'**سبأ**) Haweeney iyo arli midna ma aha, waase nin dhalay toban nin oo Carab ah, kuwaasoo ay lix ka mid ihi Yaman**يمن** aadeen oo ay degeen, afarna ay Shaam**الشام** aadeen oo ay degeen. Kuwa Shaam**الشام** aaday oo degey waxay yihiin: Lakhm**لخم** iyo Juthaam**جذام** (Waana qabiilka uu Nabi Ciise**عيسى**, Calayhissalaamu ka guursan doono markuu Samada kasoo dego) iyo Caamilatu**عميلة** iyo Ghassaan**غسان**. Kuwa Yaman**يمن** aaday oo degeyna waa Al Azdu**الأزد** iyo Al Ashcaruuna**الأشعرون** iyo Ximyar**حمير** iyo Mathxij**مذحج** iyo Kindatu**كندة** iyo Anmaar**أنمار**".

Markaasuu ninkii wuxuu yiri:
"Anmaarna**أنمار** muxuu yahay?"

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"الذين منهم خثعم وبجيلة."

"Allathiina minhum Khathcam wa Bajiilah",
oo ah:

"Waa kuwa ay ka tirsan yihiin Khathcam**خثعم** iyo Bajiilah**بجيلة**."
Raggaas oo idil qabaa'il magacdooda sita ayaa ka wada farcamay. Waana Xadiithka saddex kun iyo laba boqol iyo labaatan ee Al Tarmithii**الترمذي.**

Waxaa la yiri Bajiilah**بجيلة** waxay ahayd haweeney Xabashiyad ah oo ilmaha Anmaar**أنمار** oo aan soo magacawnay xannaaneyn jirtay, taasoo aan soo xannaaneyn wiilkiisa Aftalu**أفتل** oo aan sidaas ayada loo nisbeyn, midkaanoo uu qabiilka Khatcam**خثعم** ka farcamay.

Al Aws iyo Al Khazraj\الأوس و الخزرج

Qabaa'il Carab ah ayaa ayaguna Al Madiinah**المدينة** degay, ayna ugu weyn yihiin uguna fadli badan yihiin uguna khayr badan yihiin labada qabiil ee Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** Al Quraanka Al Ansaar**الأنصار** u bixiyey oo kala ah Al Aws iyo Al Khazraj**الأوس و الخزرج** , ahna kuwa u gargaaray oo u hiilliyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, si uu Risaalada Ilaahay dadka ugu gudbiyo oo annagana sidaas nagu soo gaarto.

Al Aws iyo Al Khazraj**الأوس و الخزرج** waxay ahaayeen laba nin oo walaalo ah oo isku hooyo iyo isku aabe ah, kana soo qaxay arliga Yaman kaddib markuu burburay biyo xireenka Saddu Al Carimu**سد العرم** oo ku xusan Aayadda lix iyo tobnaa ee Suuratu Saba'**سورة سبأ**:

فَأَعْرَضُوا فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ سَيْلَ الْعَرِمِ

"Fa acraduu fa arsalnaa calayhim sayla al carami",
oo macneheedu yahay:
"Way jeesteen oo gaaloobeen markaasaan waxaan kusoo sii daynnay daadka biyo xireenka Al Carami**العرم**."

Markaasey labadaas nin Al Madiinah**المدينة** soo degeen.
Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Ssaxxaar**عبد الحميد جودة السحار** wuxuu kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi**محمد رسول الله**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, mujalladka shanaad bogga boqol iyo afar iyo konton ku yiri:
"Markay Yathrib**يثرب** yimaadeen oo ay degeen labadaas nin oo walaalaha ah, oo kala ah Al Aws bin Xaarithah**الأوس بم حارثة** iyo walaalkiis Al Khazraj bin Xaarithah**الخزرج بن حارثة** waxay ku noolaayeen muddo isagoo uusan Al Aws**الأوس** lahayn wiil aan ahayn Maalik**مالك.**

Walaalkiis Al Khazraj bin Xaarithah**الخزرج بن حارثة** waxaa u dhashay shan wiil oo kala ah Camr **عمرو** iyo Cawf**عوف** iyo Jusham**جشم** iyo Kacb**كعب** Ninka shanaad ma uusan magacaabin).

Markaasey bateen oo ay laba qabiil noqdeen iyo jilbo. Jilibka ugu caansan ee Al Khazraj**الخزرج** waa Banuu Al Nnajjaar**بنو النجار**."

Hooyadooda labadoodaas ee Al Aws iyo Al Khazraj **الأوس و الخزرج** dhashayna waxaa la oran jiray Qaylah**قيلة**.

Boqridda Tubbac\تبع

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Markuu Rabiicah bin Nasr**ربيعة بن نصر** dhintay boqortooyada Yaman**يمن** o idili waxay dib ugu soo noqotay Xassaan bin Tubbaan Ascad Abii Karibu**حسان بن تبان أسعد أبي كرب**.

Xassaan aabihiis Tubbaan Ascad Abii Karibu**حسان بن تبان أسعد أبي كرب** waa Tubbac Al Aakhir **تبع الأخر**\ waana ibnu Kulkii Kariba bin Zayd**أبن كلكي كرب بن زيد**.

Awoowihiisaan Zayd**زيد** ahna waa Tubbac Al Awwal bin Camr Thii Al Athcaar bin Abrahah Thii Al Manaar bin Al Rriish**تبع الأول بن عامر ذي الأذعار بن أبرهة ذي المنار بن الريش** (oo uu ibnu Hishaam**إبن هشام** yiri "waa Al Rraa'ish**الرائش** oo loogu bixiyay siduu dadkiisa ugu ruhseeyey oo u siiyey wax ka batay oo maal ah", wuxuuna ahaa boqorka ugu horreeya ee ghaniimaysta siduu Al Suhaylii**السهيلي** u yiri) bin Cadiyy bin Sayfii bin Saba' Al Asghar bin Kacb Kahfa Al Thulmi bin Zayd bin Sahl bin Camr bin Qays bin Mucaawiyah bin Jusham bin Cabdu Shams bin Waa'il bin Al Ghawth bin Qadhan bin Cariib bin Zahiiri bin Aymana bin Al Hamaysic bin Al Caranjaj **بن عدي بن صيفي بن سبأ الأصغر بن كعب بت كهف الظلم بن زيد بن سهل بن عمرو بن قيس بن معاوية بن جشم بن عبد شمس بن وائل بن الغوث بن قطن بن عريب بن زهير بن أيمن بن الهميسع بن العرنجج**.
Al Caranjaj**العرنجج** waa Ximyar bin Saba'a Al Akbar bin Yacrub bin Yashjub bin Qaxdhaan **حمير بن سبأ الأكبر بن يعرب بن يشجب بن قحطان**\ (oo uu ibnu Hishaam**إبن هشام** yiri "waa Yashjub bin Yacrub bin Qaxdhaan**يشجب بن يعرب بن قحطان**).

Tubbaan Ascad Abuu Karibu**تبع أسعد أبو كرب** waa boqorka Al Madiinah**المدينة** yimid oo labada caalin oo yuhuudda ah arliga Yaman**يمن** u watay, waana kan Kacbada cammiray Kiswana**كسوة** ugu arratiray, boqortooyadiisuna waxay ahayd ka hor boqortooyada Rabiicah bin Nasr **ربيعة بن نصر**\."

Al Dhabarii**الطبري** wuxuu tariikhdiisa (mujalladka koowaad bogga saddex boqol iyo kow iyo soddon) ku yiri:
"Kaddib waxaa dabadiis boqor noqday Tubbac**تبع** oo ah Tubbaan bin Ascad**تبان بن أسعد**, ahna Abuu Karib bin Mulkii Karib Tubbac bin Zayd bin Camr bin Tubbac **أبو كرب بن ملكي كرب تبع بن زيد بم عمرو بن تبع**\, waana midka la yiraahdo Thuu Al Athcaar**ذو الأذعار** (oo loogu bixiyey siduu dadku uga cabsaday, kaddib markuu inta turkiga ku duulay oo uu jebiyay wax xun ku falay oo sidaas looga baqay, oo thacarahu**ذعره** waxaa weeye wuu cabsiiyey siduu Al Raazii**الرازي** u fasiray) bin Abraha Tubbac Thii Al Manaar**أبرهة تبع ذي منار** (oo loogu bixiyey inuu buuraha madaxdooda dab ka shidi jiray si dariiqa loogu hanuuno) bin Raa'ish bin Qays bin Sayfiyyi bin Saba'a **بن رائش بن قيس بن صفي بن سبأ**\ lana oran jiray Al Rraa'idu**الرائد** (oo ah horseedka sahmiya).

Tubbacaan**تبع** wuxuu noolaa zamanka Bushtaasib**بشتاسب** iyo Ardashiir Bihman bin Isfindiyaar bin Bushtaasib**أردشير بهمان بن اسفنديار بن بشتاسب** (oo ahaa boqorro Faaris).

Markaasuu Yaman**يمن** kasoo baxay isagoo ciidan wata uuna qaaday dariiqa uu isaga hortiis maray Al Rraa'ishu**الرائش,** uuna soo maray labada buurood ee Dhayyi'i**طيئ** (oo Al Madinah **المدينة** Waqooyigeeda ku taalla uuna dego qabiilka Dhayy'i**طيئ** oo uu ka dhashay Xaatim bin Cadiyy Al Dhaa'ii**حاتم بن عدي الطائي** saxaabiga wayn, Allaha raalli ka noqdee), kaddibna uu halkaas gudbay isagoo u socda Al Anbaar**الأنبار.**

Markaasuu markuu Al Xiirah**الحيرة** yimid, wuxuuna yimid habeennimo, ayuu wareeray. Markaasuu bartaas degay, oo sidaas loogu bixiyey Al Xiirah**الحيرة,** oo macneheedu yahay wareer. (Al Anbaar**الأنبار** iyo Al Xiirah**الحيرة** waxay labadooduba ku yaalliin arliga Ciraaq**عراق**). Kaddibna wuu dhaqaaqay wuxuuna halkaas uga tegay dad u dhashay qabaa'ilka Al Azd**الأزد** iyo Lakhim**لخم** iyo Juthaam**جذام** iyo Caamilah**عاملة** iyo Qudaacah**قضاعة.**

Markaasey halkaas degeen oo dhiseen, kaddibna waxaa lasoo degay dad u dhashay Dhayy'i**طيئ** iyo Kalb**كلب** iyo Al Ssakuun**الساكون** iyo Balxaarith**بلحارث** bin Kacb**كعب** iyo Iyaad**إياد.**

Kaddibna wuxuu aaday Al Anbaar**الأنبار**, kaddibna Al Mawsil**الموصل.** Kaddibna wuxuu tegey Azerbijaan, halkaasoo ay dagaal isaga hor yimaadeen turkiga, wuuna jebiyey oo uu dagaal yahankoodana laayey dhasha iyo haweenkoodana addoonnimo u qafaashay.

Tubbac\تبع oo shiinaha ku duulay, ka adkaaday oo gumaystay

Kaddibna wuxuu usoo gaddoomay Yaman**يمن.** Yaman**يمن** ayuu zaman ku nagaaday. Markaasey boqorrada adduunku ka cabsadeen, ayna hadiyooyin usoo direen. Markaasaa waxaa u yimid Ergayga boqorka Hindiya oo sida hadiyooyin naadir ah oo ka kooban xariir iyo miski iyo cuud iyo waxyaalo kale oo qaali ah oo laga helo arliga hindiga. Markaasuu Tubbac**تبع** wuxuu arkay wuxuusan hore u arkin wax la mid ah. Markaasuu wuxuu Danjiraha ku yiri:
"Warhoy! Waxaan aan u jeedo o idil ma dalkiinna ayaa laga helaa?"
Wuxuu yiri:
"Maya, oo in yar ayaa dalkeenna laga helaa, intooda badanna arliga Shiinaha."

Markaasuu u sifeeyey arliga shiinaha iyo waynaantiisa iyo barwaaqadiisa iyo badnida maalkooda. Markaasuu Tubbac**تع** wuxuu ku dhaartay inuu Shinaha ku duulayo.

Markaasuu ciidan ka kooban ragga qabiilka Ximyar**حمير** watay, uuna socday ilaa uu ka yimaado arligay deggan yihiin kuwa xirta koofiyadaha madow (waana Ciraaq**عراق**). Markaasuu nin ciidankiisa ka mid ah lana yirahdo Thaabit**ثابت** oo wata ciidan wayn u diray xagga shiinaha.
Markaasaa Thaabit**ثابت** dagaal lagu dilay.

Markaasuu Tubbac**تبع** ciidankiisa watay oo uu arliga shiinaha galay, oo uu dagaalyahannadoodana laayey, wuxuu helana bililiqaystay, maalkoodoo idilna qaatay.

Waxaana la yiri inay intuu arliga shiinaha usii socday iyo intuu dhexdiisa joogay iyo soo noqoshadiisu qaadatay toddoba sano.

Wuxuu Tubbac**تبع** arliga shiinaha, kaddib markuu jebiyay, kusoo reebay laba iyo toban kun nin oo fardooley ah ee qabiilka Ximyar**حمير** (oo maalka shiinaha usoo diri jiray), kuwaasoo ay ka

farcameen dadla Ahlu Al Tubbati**أهل التبت** (malaha waa dadka dega gobolka shiinaha ka tirsan maanta oo la yiraahdo Tibet, oo Shiinaha inyo Hindiya u dhexeeya) oo shiinaha dega, yiraahdana inay Carab yihiin, abuuristooda iyo midabyadooda iyo khuluqdooduna ay kuwa Carabta yihiin."

Xanaaqqa Tubbac\تبع ee reer Al Madiinah\المدينة

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Tubbaan**تبان** markuu xagga bari iyo Yaman**يمن** ka yimid oo uu xagga shiinaha u socday wuxuu maray oo dariiqiisa ahayd Al Madiinah**المدينة.** Markaasuusan dadka deggan wax dhibaato ah u geysan, wuxuuse ka baqay inay dariiqa ka gooyaan (waana yuhuudda deggan siduu Al Qutaybiyyu**القتيبي** u yiri), oo markuu shinaha kasoo laabto uu waayo dariiq uu Yman**يمن** u maro.
Markaasuu wuxuu halkaas ku reebay oo uu uga tegey inay dariiqa dib usoo laabashadaiisa u sugaan ciidan uu madax uga dhigay wiil uu isaga laftiisu dhalay.
Markaasey intay gaadeen ay wiilkiisa dileen.

Markaasuu markuu Tubbac**تبع** shiinaha kasoo laabtay Al Madiinah**المدينة** usoo kicitimay, isagoo dilidda wiilkiisa aad uga careysan, doonayana inuu magaalada burburiyo, dadkeedana uu xididdada u siibo oo laayo, geed timireedkoodana uu gooyo.

Markaasey qabaa'ilka Ansaartu**الأنصار** isku yimaadeen ayna guddoomiye ka dhigteen ninka la yiraahdo Camr bin Dhallah**عمرو بن طلة** oo u dhashay Banii Al Nnajjaar**بني النجار**, kana sii ah Banii Camr bin Mabthuul**بني عمرو بن مبذول.**

Mabthuul**مبذول** magaciisuna waa Caamir bin Maalik bin Al Nnajjaar**عامر بن مالك بن النجار**. Al Nnajjaar**النجار** magaciisuna waa Taymu Allaahi Thaclabah bin Camr bin Al Khazraj bin Xaarithah bin Thaclabah bin Camr bin Caamir **تيم الله ثعلبة بن عمرو بن الخزرج بن حارثة بن ثعلبة بن عمرو بن عامر** (Ibnu Hishaamna**إبن هشام** wuxuu yiri:
"Camr bin Dhallah**عمرو بن طلة** waa Camr bin Mucaawiyah bin Camr bin Caamir bin Maalik bin Al Nnajjaar**عمرو بن معاوية بن عمرو بن عامر بن مالك بن النجار.**
Dhallah**طلة** waa hooyadiis, waana bintu Caamir bin Zurayq bin Caamir bin Zurayq bin Cabdu Xaarithah bin Maalik bin Ghadhb bin Jusham bin Al Khazraj **بنت عامر بن زريق بن عبد حارثة بن مالك بن غضب بن جشم بن الخزرج**").

Markaasuu Tubbac**تبع** wuxuu degay buurta Jabalu Uxud**جبل أحد**.

Al Zarqaanii**الزرقاني** wuxuu ibnu Casaakir**إبن عساكر** ka wariyay inuu ciidanka Tubbac**تبع** ahaa boqol iyo soddon kun oo fardooley ah iyo boqol iyo saddex iyo toban kun oo lugley ah.

Markaasey reer Al Madiinah**المدينة** qalcadohooda isku ilaaliyeen oo ay hoosta kasoo xirteen. Markaasuu Tubbac**تبع** nin askartiisa ka mid ah u diray inuu geedohooda timirta gooyo.

Dagaalka dadka Al Madiinah\المدينة iyo Tubbac\تبع

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Ninka la yiraahdo Axmar**أحمر** oo u dhashay reer Banii Cadiyy bin Al Nnajjaar**بني عدي بن النجار** ayaa wuxuu arkay nin ciidanka Tubbac**تبع** ka mid ah oo geed timireed uu isagu leeyahay

goynaya. Markaasuu ku booday oo uu ku dhftay birta qaroofan ee beeraha lagu shafo oo uu dilay. Kaddibna wuxuu yiri:
"Timirta waxaa iska leh ninka beerta."

Dilidda ninkaasu waxay sii kordhisay xanaaqqa Tubbac**تبع** uu dadka Al Madiinah**المدينة** dega u qabo. Markaasey dagaallameen oo uu dagaal hubaysan dhex maray. Ansaartu**الأنصار** waxay leeyihiin inay maalintiina Tubbac**تبع** la dagallamayeen, habeenkiina ay cunnada martida lagu sooro u geyn jireen.
Markaasuu Tubbac**تبع** falkoodaas la yaabay, wuxuuna yiraahdaa:
"Wa Allaahi**والله** dadkeennu waa kariimiin."

Isagoo uu Tubbac**تبع** sidaas ula dagaallamayo ayaa waxaa isaga u yimid laba nin oo axbaarta yuhuuda ka mid ah, waa culummadoodee,, una dhshay reer Banii Quraythah**بني قريظة.**
Quraythah**قريظة** iyo (yuhuudda kale ee) Banii Al Nadiir**بني النضير** iyo Al Nnajjaam**النجام** iyo Camr**عمرو** -oo ah Hadal**هدل**- waa dhasha Al Khazraj bin Al Sariix bin Al Tawmaan bin Al Ssibdhi bin Al Yasac bin Sacd bin Laawii bin Khayz bin Al Nnajjaam bin Tanxuum bin Caazar bin Cizraa bin Haaruun bin Cimraan bin Yashar bin Qaahith bin Laawii bin Yacquub -ahna Israa'iil- bin Isxaaq bin Ibraahiim Khaliilu Al Rraxmaani **الخزرج بن الصريح بن التومان بن السبط بن اليسع بن سعد بن لاوي بن خيز بن النجام بن تنحوم بن عازر بن عزرى بن هارون بن عمران بن يشر بن قاهث بن لاوي بن يعقوب – و هو إسرائيل – بن إسحاق بن إبراهيم خليل الرحمن**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Tubbac iyo labada wadaad ee yuhuudda ee Suxayt\سحيت iyo Munabbihunمنبه

Labadaas caalin waxay ahaayeen laba nin oo cilmi qoto dheer leh. Markaasey markay maqleen wuxuu Tubbac**تبع** doonayo inuu sameeyo oo ah inuu Al Madiinah**المدينة** burburiyo dadkeedana laayo ayay u yimaadeen. Markaasey waxay ku yiraahdeen:
"Boqorow, sidaas ha yeelin. Haddadse ku adkaysato inaad Al Madiinah**المدينة** burburisid dadkeedana laysid waa lagaa hor istaagaya oo ma kari kartid. Annaguna waxaan kaaga baqaynnaa inay kugu soo degato cathaab degdeg ah."

Markaasuu wuxuu labadooda ku yiri:
"Sababtuna maxay tahay?"
Waxay ku yirahdeen:
"Al Madiinah**المدينة** waa meeshuu usoo haajirayo Nabi kasoo baxaya Xaramkaan Quraysh **حرم قريش** (oo ah Makkah**مكة**) aakhiru zamanka, waxayna noqoneysa magaaladiisa iyo meeshu degayo."

Markaasuu Tubbac**تبع** wuxuu doonayey inuu falo ka haray, wuxuuna arkay inay yihiin laba nin oo cilmi leh, wuuna u bogay wuxuu ka maqlay.

Markaasuu Al Madiinah**المدينة** ka gaddoomay, uuna diintooda ku raacay. Qabaa'ilkaan Ansaarta **الأنصار** ahna waxay leeyihiin Tubbac wuxuu u xanaaqay qabiilka yuhuudda ah oo ayaga la degganaa, kuwaasoo uu doonayey inuu laayo. Markaasey ayaguna ka celiyeen, oo uu markaas ka gaddoomay.” Waa intaas warka ibnu Isxaaq Allaha dambigiisa dhaafee.

Tubbac\تبع

Tubbac**تبع** waa laqab loogu yeeri jiray nin kasta oo Yaman**اليمن** boqor u noqda, sida midka Masar**مصر** boqor u noqda loogu yeeri jiray Fircoon**فرعون,** ama kan waagaan Soomaaliya u noqda loogu yeero Madaxwayne.

Tubbac**تبع** wuxuu ku xusan yahay laba Aayadood ee Quraanka Kariimka ah. Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Al Dukhaan**سورة الدخان**:

أَهُمْ خَيْرٌ أَمْ قَوْمُ تُبَّعٍ

"Ahum khayrun am qawmu Tubbacin?"
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ma ayagaa, waa gaaladdi Makkah**مكة**, khayr badan oo ah ka xoog badan oo ka adag oo ka tiro badan dadkii Tubbac**تبع?** Mana aha."
Waxaa kaloo xustay Tubbac**تبع** Aayadda afar iyo tobnaad ee Suuratu Aayadda Qaaf**سورة ق:**

وَقَوْمُ تُبَّعٍ

"Wa qawmu Tubbacin".
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
"Ayaga hortood waxaa beeniyay, waana gaalada Makkah**مكة**, dadka Nuux**نوح** iyo Asxaabu Al Rrassi**أصحاب الرس** iyo Thamuud**ثمود**, iyo Caad**عاد** iyo Fircoon**فرعون** iyo walaalaha Luudh **إخوان لوط\,** iyo Asxaabu Al Aykati**أصحاب الأيكة** iyo dadka Tubbac**تبع,** oo kulligood waxay beeniyeen Rususha loo diray markaasey cathaabteydu ku dhabowday. Ilaahay dadkiisuu eedeeyey ee Tubbac**تبع** laftiisa ma eedeyn, sidaas ayuu Qataadah**قتادة** u wariyay."

Al Suhaylii**السهيلي** wuxuu yiri:
"Abuu Hurayrah**أبو هريرة** wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"لا تسبوا أسعد الحميري، فإنه أول من كسا الكعبة."

"Laa tasubbuu Ascada Al Ximyariyya, fa innahu awwalu man kasaa Al Kacbah."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Ha caayina Ascada Al Ximyariyya**أسعد الحميري** , kan Ximyar**حمير** u dhashay, isagaana ahaa kan ugu horreeyey oo Kacbada Kiswo**كسوة** ugu arratira."

Wuxuu kaloo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"لا تسبوا تبع، فإنه كان مؤمنا."

"La tasubbuu Tubbacan, fa innahu kaana mu'minan."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Tubbac\تبع ha caayina, oo wuxuu ahaa nin mu'min ah."
Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu yiri:
"Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu Al Mubtada'\المبتدء iyo Qisasu Al Anbiyaa'i\قصص الأنبياء ku wariyay inay Tubbac\تبع Hindiya ku dhintay, ayna dhimashadiisa iyo dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kun sano oo kaamil ah u dhexeysey."

Guriga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Al Madiinah\المدينة

Kitaabka magaciisu yahay Taariikhu Macaalimi Al Madiinah Al Munawwarah Qadiiman wa Xadiithan/**تاريخ معالم المدينة المنورة قديما وحديثا,** waxaa dhigay Shariifka Al Sayyid Axmad Yaasiin Axmad Al Khayyaarii Al Madanii Al Azharii Al Xusaynii **السيد أحمد ياسين أحمد الخياري المدني الأزهري الحسيني/,** oo ka mid ah dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la oofsadayna toddoba iyo tobanka bisha Rajab**رجب** ee sanadka kun iyo saddex boqol iyo sideetanka Hijriga, waxaana faallada ku daray iyo wixii cusbaa ee geerida dhigaha kitaabka ka dambeysey magaciisuna yahay Al Istaath Cubaydu Allaahi Muxammad Amiin Kurdii **الأستاذ عبيد الله محمد امين كردي/**, oo macallin ka ah Jaamacadda Al Kulliyah Al Mutawassidhah li icdaadi Al Mucallamiina bi Al Madiinah Al Munawwarah**الكلية المتوسطة لإعداد المعلمين بالمدينة المنورة**, ahna Jaamacadda Macallimiinta soo saarta.

Al Khayyaarii**الخياري** wuxuu yiri:
"Daarta Abuu Ayyuub Al Ansaarii**أبو أيوب الأنصاري**, waa daartuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku degay, waana daarta loo yaqaanno Daaru Abuu Ayyuub Al Ansaarii**دار أبو أيوب الأنصاري.**

Daartaas waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhisay Tubbac**تبع** boqorka Ximyar**حمير**, oo magaciisu yahay Ascad bin Kulkii Karib**أسعد بن كلكي كرب**, wuxuuna ka mid yahay Tubbacyada, bal waa madoxooda iyo kooda ugu horreeyey iyo hoggaamiyohooda iyo odagoodaba.

Taasu waxay ku ahaatay markuu Tubbac**تبع** Al Madinah**المدينة** soo maray ayadoo ay la socdaan afar boqol oo caalin, oo wadajir u go'aansaday inayan Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** ka bixin oo ayan Yaman**يمن** dib ugula laaban.

Markaasuu Tubaac**تبع** wuxuu weydiiyey sirta go'aankoodaas ka dambeysa oo ay u wada dhan yihiin. Markaasey waxay yiraahdeen:
"Waxaan kitaabkeenna ka helnay oo ku dhigan inuu Nabi magaciisu "Muxammad**محمد**" ama "Axmad**أحمد**" yahay ay tani tahay magaaladuu usoo haajirayo. Marka annagu halkaan ayaan degeynnaa, annagoo rajo ka qabna inaan la kulanno oo aan markaas rumaynno annaga ama caruurteenna."

Markaasuu Tubaac**تبع** wuxuu damcay inuu isaga laftiisu la dego. Markaasuu nin walboo afartaas boqol oo caalin ka mid ah wuxuu u dhisay daar, wuxuuna u gaday gabar uu u guuriyey. Markaasu hadana mid walba oo ka mid ahna wuxuu siiyey maal fara badan.

Tubbac**تبع** wuxuu markaas warqad ku dhigay inuu isaguna islaamay, wuxuuna ku dhigay:

1.شهدت على أحمدي أنه\رسول من الله باريء النسم
2.فلو مد عمري إلى عمره\لكنت وزيرا له، و ابن عم
3.وجاهدت بالسيف أعداءه\و فرجت عن صدره كل هم.

1. Shahidtu calaa Axmadii annahu/Rasuulun mina Allaahi Baarii al nnasami.
2. Falaw mudda cumrii ilaa cumrihi/lakuntu waziiran lahu, wa ibna cammi.
3. Wa jaahadtu bi al ssayfi acdaa'ahu/wa farrajtu can sadrihi kulla hammi.

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

1.Waxaan markhaati ka ahay inuu Muxammad yahay/Rasuuluu soo diray Ilaahay kan khalqiga abuuray.
2. Hadduu cumrigeygu gaaro cumrigiisa/waxaan u noqonayaa wasiir iyo ina adeer.
3. Cadawgiisana seefta ayaan kula jihaadayaa/waxaanna ka furanayaa laabtiisa hammi kasta.

Markaasuu wuxuu warqaddaas ku dhuftay oo ku xiray shabbad dahab ah wuxuuna u dhiibay ninka culummada ugu weyn, uuna weydiistay inuu u dhiibo oo uu gacanta ka saaro Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadduu nolol ku gaaro isaga ama wiilashiisa ama wiilasha wiilashiisa.

Tubbac kaddibna wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhisay daar uu dego markuu Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** isagoo Muhaajir**مهاجر** ah yimaado.

Markaaasaa daartaas waxaa degi jiray boqorrada culummada oo uu midba kan kale ka dhaxli jiray ayaga iyo dhashoodu, ilaa ay kasoo gaarto gacan ku haynta Abuu Ayyuub Al Ansaarii **أبو أيوب الأنصاري**, oo ah dhasha culummada isaga dambeeyey xukunka Al Madiinah Al Munwwarah **المدينة المنورة\,** waana daartuu kusoo degay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Dadka reer Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** oo u gargaaray Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kulligood waa dhasha culummadaas.

Sidaas ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu kusoo degay gurigiisa uu isaga laftiisu leeyahay oo milkigiisa ah, kuna noqday siduu ugu hibeeyey ama ugu hadiyeeyey Tubbac**تبع** boqorka Ximyar**حمير**, kumana uusan degin guri uu ghayrkiis leeyahay.

Abuu Ayyuub Al Ansaarii**أبو أيوب الأنصاري** wuxuu ahaa ilaaliyaha daartaas oo gacanta ku hayey oo keli ah, mana ahayn wax kale. Sidaas ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u degganaa gurigiisa ilaa uu ka dhisto Masjidkiisa.

Al Imaamu Al Suhaylii**الأمام السهيلي** wuxuu wariyay inay daartaasu Abuu Ayuub Al Ansaarii **أبو أيوب الأنصاري** dabadiis u wareegtay mawlihiisa magaciisu yahay "Aflax**أفلح**",** kanna uu ka iibiyey Al Mughiirah bin Cabdu Al Rraxmaan**المقيرة بن عبد الرحمن** kana siiyey kun Diinaar.
Kaddib waxaa gatay boqorka Shihaabu Al Ddiini Ghaazii bin Al Malik al caadil akhii Nuur Al Ddiin**شهاب الدين غازي بن مالك العادل أخي نور الدين** ee caanka, kana dhigay dugsi loo bixiyey Al Madarisah Al Shihaabiyyah**المدرسة الشهابية,** oo isaga loo nisbeeyey.

Dhammaadka qarniga saddex iyo tobnaad ee Hijriga dib ayaa masjid ahaan loogu dhisay." Waa intaas warka shariifka Al Khayyaari**الخياري**, Allaha u naxariistee.

Daartaas waxaa la dumiyey sanadka kun iyo afar boqol iyo toddoba, waana mar hadda labaatan sano oo keli ah laga joogo, waxayna ka mid tahay daydka koofureed ee Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo lagu tukado, siduu Doktoor Muxammad Ilyaas Cabdu Al Ghanii **د\محمد إلياس عبد الغني** ku sheegay kitabkiisa Buyuutu Al Ssaxaabah**بيوت الصحابة,** bogga sagaal iyo lixdanaad, waxayna dhawr tillaabo u jirtaa Minaaradda wayn ee ra'iisiga ah ee geeska koofur/bari ee Masjidka.

Qisadaan uu Al Khayyaarii**الخياري** wariyayna waxaa wariyay ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** kuna wariyay kitaabkiisa Al Mubtada'**المبدء**, ibnu Hishaamna**إبن هشام** wuxuu ku wariyay Kitaabu Al Tiijaani**كتاب التيجان.**

Warqadda Tubbac\كتاب تبع

Al Zarqaanii**الزرقاني** wuxuu yiri:
"Abuu Ayyuub Al Ansaarii**أبو أيوب الأنصاري** waa dhasha caalinkaas uu Tubbac**تبع** Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warqadda ugu dhiibay.

Markaasaa markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo baxay, oo ah markuu dadka islaamka ugu yeeray bilowga Nabinnimada, ayay warqadda Tubbac**تبع** usoo direen waxayna ugu soo dhiibeen ninka la yiraahdo Abuu Laylaa**أبو ليلى.**

Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, arkay ayuu wuxuu ku yiri:

"أنت أبو ليلى، و معك كتاب تبع."

"Anta Abuu Laylaa, wa macahu kitaabu Tubbac."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Adigu waxaad tahay Abuu Laylaa**أبو ليلى**, wuxuuna sidaa warqadda Tubbac**تبع.**"

Markaasuu Abuu Laylaa**بو ليلى** cabbaar fakarayey, mana uusan aqoon Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu wuxuu yiri:
"Kumaad tahay? Aniguna wajigaaga kuma aanan arag inaad sixiroole tahaye!"

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"أنا محمد. هات الكتاب."

"Anaa Muxammad. Haati al kitaaba."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Anigu waxaan ahay Muxammad**محمد** ee warqadda ii dhiib."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam markuu akhriyey wuxuu yiri:

"مرحبا بتبع الأخ الصالح."

"Marxaban bin Tubbacin al akhu al ssaalixu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Soo dhowow Tubbacow**تبع**, ahna walaalka suuban."
Sidaas ayuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri sadex goor.

Al Siirah Al Xalabiyyah**السيرة الحلبية** warinteeduna waa sidatan:
"Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo bannaan baxay oo uu dadka islaamka ugu yeeray ayaa warqaddaas -oo la yiri waxaa hayey Abuu Ayyuub Al Ansaarii **أبو أيوب الأنصاري** - waxaa loogu soo dhiibay nin la yiraahdo Abuu Laylaa**أبو ليلى.**

Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arkay ayuu wuxuu ku yiri**:**

"أنت أبو ليلى، الذي معك كتاب تبع الأول."

"Anta Abuu Laylaa, allathii macaka kitaabu Tubbac Al Awwal."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Adigu waxaad tahay Abuu Laylaa**أبو ليلى,** waxaadna sidaa warqadda Tubbaca**تبع** Koowaad."
Markaasuu Abuu Laylaa**أبو ليلى** wuxuu ku yiri:
"Kumaad tahay?"
Wuxuu yiri:

"أنا محمد، هات الكتاب."

"Anaa Muxammad, haati al kitaaba."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Anigu waxaan ahay Muxammad**محمد** ee warqadda keen."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam akhriyey, waxaana u akhriyey Abuu Laylaa**أبو ليلى** .
Culummada qaarkoodna waxay leeyihiin inay warqadda ku dhignayd:

أما بعد ، فإني آمنتُ بكَ ، وبكتابكَ الذي أُنزلَ عليكَ ، وأنا على دينك وسُنَّتِكَ ، وآمنتُ بربك وبكل ما جاء من ربك من شرائع الإيمان والإسلام ، فإنْ أدركتكَ فبها ونعمتْ ، وإلا فاشفعْ لي ولا تنسني يومَ القيامة فإني من أمتك الأولين ، وقد بايعتكَ قبل مجيئكَ ، وأنا على ملتكَ وملة أبيكَ إبراهيم – عليه السلام . ثم ختم الكتاب ، ونقش عليه : (لله الأمر من قبلُ ومن بعد) . وكتب عنوانه : إلى محمد بن عبدالله ونبي الله ورسولـــــه وخاتم النبيين ، ورسول رب العالمين – صلى الله عليه وسلم - من تبَّعَ الأول الحِـمْيَرِيّ.

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Intaas kaddibna, Muxammadow**محمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, anigu waan ku aaminay iyo Rabbigaaba iyo Rabbiga wax walba iyo dhammaan waxaad xagga Rabbigaa ka keentay, oo ah shareecada Islaamka iyo iimaanka. Anigaana sidaas iri. Haddaan kusoo gaaro waa liibaan iyo nicmo. Haddaaanan kusoo gaarinna Maalinta Qiyaame ii shafeeco qaad, hana i halmaamin, oo anigu waxaan ka mid ahay asalka kuwa hore, waxaanna ku baayacay imaatinkaaga hortiis iyo ka hor intuusan Ilaahay kusoo dirin. Aniguna waxaan ku taaganahay Diintaada iyo Diinta Ibraahiim**إبراهيم**."
Markaasuu wuxuu akhriyey:

فِي بِضْعِ سِنِينَ لِلَّهِ الْأَمْرُ مِنْ قَبْلُ وَمِنْ بَعْدُ وَيَوْمَئِذٍ يَفْرَحُ الْمُؤْمِنُونَ (4) بِنَصْرِ اللَّهِ

"Lillaahi al amru min qablo wa min bacdu wa yawma'ithin yafraxu al mu'minuuna. Bi nasri Allaahi."
Waana Aayadaha afar iyo shan qaybo ka mid ah ee Suuratu Al Rruumi**سورة الروم**, macnohooduna waxaa weeye:

"Amarkana Ilaahay ayaa iska leh ka hor iyo kaddibba, maalintaas ayayna mu'miniintu farxayaan. Gargaarka Ilaahay."

Wuxuuna Aayadahaas akhriyey soo degiddooda ka hor. Warqaddana wuxuu cinwaan uga dhigay:
Ku socota: Muxammad bin Cabdu Allaahi**محمد بن عبد الله** kan lagu gunaanaday Anbiya iyo Mursaliinta ahna Rasulka caalamiinta Rabbigooda.
Waxayna ka socotaa: Tubbac Al Awwal**تبع الأول** Ximyar**حمير.** Waana amaanada Ilaahay inuu qofkay qoraalkaanu gacantiisa gasho inuu u dhiibo ninka iska leh." Waa intaas warinta Al Xalabiyyah**الحلبية.**

Burburka biyo xireenka Saddu Ma'rib\سد مأرب

Ma'rib**مأرب** waxay ahaan jirtay caasimadda Boqorrada Saba'**سبأ** qaarkood, ayna ka mid ahaayeen boqoradda Bilqiis**بلقيس.** Magaalada Ma'rib**مأرب** waxaa ku oolli jiray biyo xireen ay biyihiisa beeruhu ugu bixi jireen, kuna xusan Quraanka Kariimka ah oo uu Ilaahay Tacaalaa **الله تعالى** Suurad dhan ku magacaabay, waana Suuratu Saba'**سورة سبأ.**

Intay muslinka ahaayeen oo ay Ilaahay keligiis caabudayeen biyo xireenkaas way ku noolaadeen oo ku nicmaysteen. Markaasay gaaloobeen oo ay bilaabeen inay asnaam caabudaan. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** biyaha biyo xireenkaas ku sii daayay oo ay caasimaddooda Ma'rib **مأرب** burburisay.

Ma'rib**مأرب** waxay ku taalla xuduudda ay Yaman**يمن** la leedahay Boqortooyada Sucuudiga, ayada agteeda ayuuna ka bilaawdaa lama degaanka wayn oo la yiraahdo "Al Rubucu Al Khaalii**الربع الخالي".**
Ma'rib**مأرب** waxaa hadda laga qodaa shidaalka Yaman**يمن** in badan oo ka mid ah, waxaana la sheegay inay hoosteeda iyo gobolkaas ku duugan tahay bad batrool ah oo ilaa sucuudiga hoos ka xiriira, runtana Rabbi ayaa og.

Ma’rib**مأرب** waxaa dega qabiilka Banii Muraad**بني مراد** oo dawladda hadda jirta ku kacsan, ayagoo tirsanaya, sida la igu yiri markaan sanadka hadda lasoo dhaafay tegay inayan batroolka gobolkooda laga qodo aan xaqqooda laga siin, iyo shaqaalaha batroolka ka shaqeeya inaan ayaga saamigooda laga siin, iyo inayan dawladduu deegaankooda dan ka lahayn ayadoo aan dugsiyo, isbitaallo waddooyin, iwm ka dhisin.

Ninka yaman**اليمن** u dhashay oo la yiraahdo Muxammad Xusayn Al Farax**محمد حسين الفرح** wuxuu kitaabkiisa(**معالم تاريخ اليمن عبر 9000 سنة**) **الجديد في تاريخ دولة وحضارة سبأ وحمير** ayna daabacday oo faafisay Dawladda Jamhuuriyada Yaman Wasaaradda Thaqaafada iyo Dalxiiska – **الجمهورية اليمنية وزارة الثقافة والسياحة** laguna daabacay **صنعاء الحصبة ص.ب. (36)-(237)** (moc@y.net.ye) sanadka 1425H/2004M., wuxuu mujalladka labaad bogga 714 iyo inta ka dambeysa ku yiri inuu Tubbacaan, oo magaciisu yahay, ayuu yiri Camr bin Xassaan Tharaa-Amr-Ayman **تبع عمرو بن حسان (ذرا-أمر-أيمن)**, ahna midka diinta yuhuudda galay uu boqor ahaa inta u dhexeysey shan boqol iyo sagaasha sano ilaa lix boqol iyo shank a hor dhalashada Nabi Ciise Calayhissalaamu, ayna isku zaman ahaayeen Cadnaan **عدنان** (awoowaha labaatanaad ee Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam) hoggaamiyaha Al Anbaadh**الأنباط** ay caasimaddoodu ahayd Al Batraa’**البتراء** ee maanta ku taalla arliga boqortooyada Al Mamlikah Al Haashimiyah Al Urduniyah**المملكة الأردنية الهاشمية** iyo Bukhtunassar boqorka Baabil**بابل** ee arliga Ciraaq**عراق.**

Wuxuu yiri:

“Walaalkiis Mcdii Karab bin Xasaan**معدي كرب بن حسان** wuxuu boqor ahaa laga bilaabo sanadka shan boqol sagaal iyo sideetan ilaa shan boqol toddoba iyo labaatan dhalashada Ciise**عيسى** ka hor. Sidaasay labadooduba ay isku zaman la ahaayeen Bukhtunassar, taasoo ahayd qarniga lixaad ee dhalashada Ciise**عيسى** horteed.

Zamankaas ayuu ahaa markuu burburay biyo xireenka wayn ee Saddu Ma’rib**سد مأرب** uuna dumiyay Saylu Al Carimi**سيل العرم** ee koowaad oo ay biyihiisu ku wda faafeen oo kharaabiyeen arliga Saba’**سبأ.** Sababta biyaha biyo xireenkaas loogu sii daayey oo loogu kharaabiyayna waxay ahayd inay ka jeesteen oo diideen diinta Tawxiidka iyo Kalinimada Ilaahay ee xaniifka ah, ayna beeniyeen Nabiga Xanthalah bin Safwaan**حنظلة بن صفوان** iyo Rususha zamanka Macdii Karab bin Xasaan bin Ascad**معدي كرب بن حسان بن أسعد.**

Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** wuxuu yiri:

فَأَعْرَضُوا فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ سَيْلَ الْعَرِمِ

Waana Aayadda lix iyo tobnaad ee Suuratu Saba’**سورة سبأ** oo macneheedu yahay:

“Markaasay ka jeesteen oo diideen diinta islaamka, markaasaan waxaan korkooda kusoo dirnay dadka biyo xireenka.”

Wuxuu kaloo yiri:

فَجَعَلْنَاهُمْ أَحَادِيثَ وَمَزَّقْنَاهُمْ كُلَّ مُمَزَّقٍ

Waana Aayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Saba'\سورة سبأ oo macneheedu yahay:

"Markaasaan waxaan ka yeelnay wax lagu sheekeysto, si xoog leh ayaanna uu googoynay, oo markuu arligoodu kharaabay ay ka guureen oo dalal kale u kala guureen."

Sadaqa Allaahu Al Cathiimi\صدق الله العظيم. Zamankaasna wuxuu ahaa dhammaadka xukunka Macdii Karab Yucfur bin Xasaan bin Ascad\معدي كرب يعفور بن حسان بن أسعد ahaana nuska labaad ee qarniga lixaad ee dhalashada Ciise\عيسى horteed." Waa intaas warkiisu.

Wuxuu kaloo bogga toddoba boqol saddex iyo soddon ku yiri:
"Al Hamdaanii\الهمداني wuxuu (kitaabkiisa) Al Ikliili\الإكليل ku wariyay inuu boqorka Xasaan bin Ascad\حسان بن أسعد oo boqor ahaa zamanka Bukhtunassar boqorka Baabil\بابل (bogga boqol iyo kow ilaa boqol iyo sideed), wuxuuna kloo xusay inuu Nabiga Xanthalah bin Safwaan حنظلة بن صفوان\ uu isla zamankaas joogay iyo in:

"loo diray Saba'\سبأ ee Ma'rib\مأرب, markaasay markay beeniyeen ayuu Ilaahay kusoo sii daayay biyaha Sayla Al Carimi\سيل العرم."(bogga boqol kow iyo sagaashan ilaa saddex iyo sagaashan). Waa intaas warkiisu.

Wuxuu kaloo bogga toddoba boqol saddex iyo soddon ku yiri:
"Burburka labaad ee biyo xireenka qadiimka ah iyo kasoo guuridda qabiilka Al Azd\الأزد ee Ma'rib\مأرب wuxuu ahaa zamanka xukunka boqorka Camr bin Muziiqiyaa Makrib Saba' عمرو بن مزيقيا مكرب سبأ\ ee qarniga labaad ee Miilaadiga." Waa intaas warkiisu.

Waana burburkaan labaad ee biyo xireenkaas kaddib markay Al Aws iyo Al Khazraj\الأوس والخزرج soo guureen oo ay Yathrib\يثرب soo degeen, kaddibna Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى u bixiyay Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة, ayagana uu u bixiyay Al Ansaar\الأنصار.

Guuridda qabaa'ilka Al Azd\الأزد iyo qabaailka kaleba, ayna ka mid yihiin Al Aws iyo Al Khazraj\الأوس و الخزرج waxaan uga soo warbixinnay kitaabka Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee qofka doonayaa halkaas ha raadsado.

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu yiri:
"Tubbacaan\تبع wuxuu waqtigiisu ahaa toddoba boqol oo sano islaamka hortiis."
Waa intaas warka Al Suhaylii\السهيلي Allaha u naxariistee.

Wuxuu kaloo yiri:
"Labada caalin oo yuhuudda ah magacdoodu wuxuu ahaa Suxaytun**سحيت** iyo Munabbihun**منبه**."
Wuxuu kaloo yiri:
"Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Caalinka Tubbac**تبع** la hadlay magaciisu waa Balyaamiin**بليامين**, wuxuuna sheegay inay haweeney magaceedu yahay Fukayhah**فكيهة** oo u dhalatay reer Banii Zurayq**بني زريق** ay Tubbac **تبع** biyaha uga keeni jirtay ceelka la yiraahdo Bi'ru Ruumah**بئر رومة** (oo Al Madiinah**المدينة** dhexdeeda ku yaalla), kaddib markay labada caalin ku yiraahdeen waxay ku yiraahdeen, uuna dagaalka reer Al Madiinah**المدينة** ka haray."
Wuxuu kaloo yiri:
"Markaasey xeradiisa galeen. Markaasuu Tubbac**تبع** Fukayhah**فكيهة** maal siiyey ay ku hodantay, oo ay ayada iyo tolkeedba ku noqdeen kuwa Ansaarta**الأنصار** ugu hodansan ilaa uu islaamku ka yimaado." Waa intaas warka ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** Allaha u naxariistee.

Kitaabka "Saba' wa Ximyar**سبأ وحمير**" wuxuu mujalladka koowaad bogga boqol shan iyo lixdan ku yiri:
"Gaaridda ay gaartay inay ergooyinka ganacsi oo is daba jooga ee reer Yaman**يمن** ay tagaan oo degaan dalka Hindiya laga soo bilaabo zamanka boqorka Al Xaarith Al Rraa'ish**الحارث الرائش**, waxay na siinaysaa asaaska warbixinta taariikh yaqaannada carbeed safarka Tubbac Shammir Al Rraa'id**تبع شمر الرائد** iyo tegiddiisa Shiinaha, iyo inuu la dagaallamay oo jebiyay boqorkeeda Yacbar**يعبر** (Yaac Bar**ياع بر**), uuna gaaray "arli leh geedo badan iyo biyo badan iyo daaqsiin, waana arliga Tibet**التبت**. Markaasuu halkaas dejiyay soddon kun oo dagaalyahan oo tolkiis ah, markaasay degeen oo ay hananteen, boqorrana u noqdeen."

Tibet\التبت

Wuxuu kaloo yiri:
Al Mascuudii**المسعودي** wuxuu yiri:

"Arliga Tibet waa boqortooyo ka soocan arliga Shiinaha, waxaana Tibet loogu magacaabay degidda ay degeen oo ku sugnaadeen**ثبت ورتب فيها** rag Ximyar**حمير** u dhashay oo Tubbac**تبع** la socday. Dadka reer Tibet waxay waaga hore boqorradooda ku magacaabi jireen Tubbac**تبع**, ayagoo raacaya laqabka Tubbac**تبع** ee boqorka Yaman**يمن**. Kaddibna zamanka ayaa saameeyey, oo ay markaas raggaas luqadoodu is beddeshay oo afkoodii ahaa afka Ximyar**حمير** wuxuu u beddelmay afka arligaas ay degeen iyo afka kuwa dariska la ahaa oo jinsigoodu turki ahaa."

Bilqiis\بلقيس

Bilqiis**بلقيس** waxay boqorad ahayd inta u dhexeysay sagaal boqol toddoba iyo afartan ilaa sagaal boqol toddoba iyo konton ka hor dhalashad Nabi Ciise Calayhissalaamu (ahna mar laga joogo laba kun sagaal boqol kow iyo lixdan taariikhda aan kitaabkaan dhigayo oo ah laba kun iyo afar iyo toban Miilaadiga: Xasanwali), waxayna boqorad ahayd saddex iyo labaatan sano.

Kitaabkaas "Saba' iyo Ximyar**سبأ وحمير**" wuxuu mujalladka koowaad bogga laba boqol saddex iyo toddobaatan iyo inta ka dambaysa ku yiri:

“Boqoradda Saba’ Bilqiis**ملكة سبأ بلقيس** aabeheed waa boqor Iliisharax Hadaad bin Shuraxbiil bin Bariil Thii Saxar**إليشرح هداد بن شرحبيل بن بريل ذي سرح.**
Waxaa boqorrada Saba’ boqri jiray oo caleeno saari jiray “Majlisu Al Aqwaali Al Thamaaniina**مجلس الأقوال الثمانين**” oo u dhigmay barlamaanka maanta, iyo “Al Athwaa’u Al Amlaaku Al Thamaaniyati Al-Asb’in**الأذواء الأملاك الثمانية ال-"أسبئن**” ahaana madaxda iyo boqorrada sideed guri ama sideed reer oo ku abtirsada “Saba**سبأ**’”.
Sideedaas magacdoodu waxay ahaayeen: (Kow) Thuu Xazfar**ذوحزفر** (Laba) Thuu Sarwaax**ذوسرواح** (Saddex) Thuu Jadan**ذوجدن** (Afar) Thuu Saxar**ذوسحر** (Shan) Thuu Fayshaan **ذوفيشان** (Lix) Thuu Maqaar**ذومقارد** (Toddoba) Thuu Thaclabaan**ذوثعللبان** (Sideed) Thuu Cathkalaan**ذزعثكلان.** Sideedoodana waxaa dhalay oo ay ku abtirsadaan Banii Ximyar Al Asghar bin Saba’ Al Asghar**بني حمير الأصغر بن سبأ الأصغر.**
Sideetankuna waxay ahaayeen madaxda Ximyar**حمير** iyo (qabiilka) Kahlaan**كهلان** (oo ay Reer Baraawe ku abrirsadaan).
Magacdaan waa laqab oo qof kastoo wakiil ka ah laqabkaas ayuu lahaa.

Boqor waxaa noqon karay oo loo caleemo saari jiray qof ku abtirsada oo ka dhashay reerka “Aali Al Rraa’ish**آل الرائش**” boqorkii Yaman oo la oran jiray “Al Raa’ish**الرائش**”, kanoo shardigaan dejiyay.(Boqorkaan waxaa loogu koofaaray Al Rraa’ish**الرائش** isagoo deeqsi ahaa oo rasha**رش** macneheedu waxaa weeye waa rusheeyey, oo dadkiisu deeqsi u ahaa oo xoolo siin jiray oo ku rusheeyey. Xasanwali)

Bilqiis**بلقيس** iyo aabeheed kama dhalan qoyskaas “Aali Al Rraa’ish**آل الرائش**”, waxayse ka dhasheen “Banii Thii Saxar bin Al Xaarith bin Maalik bin Zayd bin Sadad bin Ximyar Al Asghar bin Saba’ Al Asghar**بني ذي سحر بن الحارث بن مالك بن زيد بن سدد بن حمير الأصغر بن سبأ الأصغر**” nasabkooduna wuxuu Aali Al Rraa’ish**آل الرائش** kula kulmaa Ximyar Al Asghar**حمير الأصغر** , ayadoo uu “Ifriiqiis**إفريقيس** iyo Thaa Al Athcaar**ذا الأذعار** ay yihiin laba wiil ee uu dhalay Thii Al Manaar bin Al Rraa’ish bin Qays bin Sayfii bin Ximyar Al Asghar bin Saba’ Al Asghar **ذي المنار بن الرائش بن قيس بن صيفي بن حمير الأصغر بن سبأ الأصغر\".**

Waxaase keentay in boqridda Bilqiis**بلقيس** dhammaan la wada oggolaado oo la isku raaco inay ayada hooyadeed u dhalatay reerkaas Aali Al Rraa’ish**آل الرائش**.

Nin ka mid ah sideetanka Aqwaal**الأقوال** ayaa kasoo horjeestay boqridda Bilqiis**بلقيس** sababna uga dhigay inayan ka dhalan “Aali Al Rraa’ish**آل الرائش**”**.** Markaasuu aabeheed, markay geeridu u timid, uuna soo jeediyay inay isaga dabadiis uu ayada boqornimo usoo jeedinayo, horena u ahaan jirtay la taliyihiisa la wada ogsoon yahay, wuxuu sideetankaas nin ku yiri:
“Ragga kuma jiro Bilqiis**بلقيس** oo kale xagga talada iyo adkaysiga, iyo cilmiga, hooyadeedna waxay ka dhalatay “Aali Al Rraa’ish**آل الرائش.** Markay qaata taladayda ayada ku saabsan. Ayada dabadeedna uu boqor noqdo ina abtigeed, oo ka dhashay “Aali Al Rraa’ish**آل الرائش**”, ahna wiil kuray ah oo caqli leh.”
Waxay yiraahdeen:
“Waana kee?”
Wuxuu yiri:
“Waa Yaasir bin Camr bin Yacfur bin Camr (bin Il Cabd bin Thii Manaar bin Al Rraa’ish) **ياسر بن عمرو بن يعفور بن عمرو (بن إل عبد بن ذي منار بن الرائش).”**
Waxay yiraahdeen:

“Waan maqalnay, waana oggolaannay.”

Magaca Bilqiis**بلقيس** wuxuu ka kooban yahay laba eray oo kala ah:
*Balq**بلق** oo macnihiisu yahay: caddaan badan, guduud xoog leh.
*Iis**إيس** oo ka mid ahaa magacda “ilaaha qorraxda”.
Marka Bilqiis**بلقيس** macnihiisu waxaa weeye: “Caddaan iyo gudduudka xoogga badan oo uu hibeeyey ilaaha qorraxda”; ama “leh quruxda qorraxda”, ama “leh quruxda ilaahnimada.”

Boqortooyada Bilqiis waxay ku fidsanayd:
*Koofurta Jaziiradda Carbeed ee Yaman**اليمن – جنوب الجزيرة العربية.**
*Al Xabashah**شمولية حكم بلقيس ملكة سبأ للحبشة**
*Eritrea.
*Xeebaha Soomaaliya tan iyo bilowga qarniga tobanaad ee ka horreeyey dhalsha Nabi Ciise Calayhisslaamu (Bogga saddex boqol lix iyo soddon wuxuu ku yiri: Buuraalayda Soomaalida ee Harare**هضبة هرر الصومال**).

Gaar ahaan waxaa tan la xiriirta:
Mumtaaz Al Caarif**ممتاز العارف** wuxuu ka wariyay kitaabka “Abyssinia” uuna dhigay Richard Greenfield iyo kitaabka “Ethiopia” ee uu dhigay David Baxton inta soo socota:
“Hareeraha kun sano ka hor Miilaadka ayay kooxo qabaa’il ah oo aan yarayn waxay ka baxeen koofurta Jaziiradda Carabta waxayna wadajir ugu duuleen qaybaha waqooyi ee Al Xabashah **الحبشة****,** ayna ka mid tahay Eritrea.

Sidoo kale qaybo ka mid ah qabaa’ilkaas waxay ka tillaabeen Baabu Al Mandab**باب المندب** una gudbeen buuraalayda Harare e qaybta bari ee Al Xabashah**الحبشة**..Sarraynta ilbaxnimadooda daraadeed ayay uga kormareen dadka degganaa arliga xabashada oo xaamiyiiunta**حاميين** ahaa, ilbaxnimadoodana ay ku khasbeen inay qaataan. Waxayna arligaas geliyeen afkooda iyo ilbaxnimadooda Saabi’iinta ah**السبئية,** iyo dhigidda fartooda iyo dhisidda guryaha iyo falashada beeraha.

Halkaas ayay arliga xabashada waxay ku beereen abuurka ilbaxnimadooda dadka hore u degganaa, kuwaasuu noloshooda oo idil aan dhaafin waxaan ahayn aasaaska iyo bilowga sida loo noolaado..Sidaasuu duullaanka iyo degidda reer Saba’**السبئية** wuxuu bilaabay ilbaxnimada Aksuum, siiyayna tayada Saba’**السبئية** ee Saamiyiinta**السامي** carabta ah oo jiridda dheer oo horreysey.” (Waa intaas warkuu kasoo qaatay kitaabkaas).

Waxaanna hore usoo sheegnay soona caddaynay in duullimaadka ugu horreeyey iyo degidda ay reer Saba’**سبأ** ee Yaman**يمن** ku degeen al Xabashah**الحبشة** ay ahayd zamanka boqorka yamaneed ee “Shimmir Yahnicm bin Camdaan bin Ifriiqiis**شمر يهنعم بن عمدان بن إفريقيس”** kaasoo Yaman**يمن** xulumay inta u dhexeysay kun iyo afartan ilaa kun Miilaadka hortiis.

Kaddib waxaa ku xigay duullaanka iyo degidda arliga Al Xabashah**الحبشة** ee reer Saba’**سبأ** zamanka “Yaasir Yuhsadaq Maliku Saba’ Wa Thii Raydaan**ياسر يهصدق ملك سبأ وذي ريدان”,** kanoo xukunka hayay inta u dhexeysa sagaal boqol saddex iyo labaatan ilaa sagaal boqol iyo toban Miilaadka hortiis ee qarniga tobnaad ee Miilaadka hortiis.”

Waxaa guud ahaan ku cad intay warisay warka ku saabsan Aksuum iyo sheekooyinka xabashadaba inay boqoradda Saba'**سبأ** ahayd boqoradda Al Xabashah**الحبشة,** taasoo ah inuu xukunka boqoradda Saba'**سبأ** oo koobayay Al Xabashah**الحبشة** iyo Eritrea iyo xeebta Soomaaliya.

Muskaatii**موسكاتي** wuxuu ku wariyay "Al Mustawdhanaatu Al Tijaariyah Al Yamaniyah Al Qadiimah Bi Saaxili Al Suumaal**"المستوطنات التجارية اليمنية القديمة بساحل الصومال** (kitaabkiisa: Al Xadaaraatu Al Saamiyah Al Qadiimah**الحضارة السامية القديمة** – Muuskaatii**موسكاتي** bogga boqol toddoba iyo toban), waxayna hoos imaanayeen xukunka boqorrada Saba'**سبأ** tan iyo bilowga qarniga tobnaad Miilaadka hortiis."
*Al Shaam**الشام**.
*Ciraq**عراق**.
*Iiraan**إيران**.
*Turkiya.
*Chiinaha.
*Masar**مصر.**

Nabi Sulaymaan Calayhissalaam markay islaantay wuxuu Bilqiis ku yiri:
"Tolkaa ka dhex dooro nin aan kuu guuriyo."
Waxay tiri:
"Nabiga Ilaahayow, ma anigoo kale ayaa nin guursata, anigoo tolkay ku leh awoodda iyo xukunka aan ku leeyahay?"
Wuxuu yiri:
"Haa, oo waxaan taas ahayn islaamku ma oggola, adigana kuuma bannaana inaad iska xaaraantimayso wuxuu Ilaahay kuu xalaaleeyey."
Waxay tiri:
"Hadday laabudda sidaas tahay, hadaba waxaad ii guurisaa Batac**بتع** Boqorka Hamdaan**همدان** (oo safarkeedaas kula jiray oo la socday: Xasanwali)."
Markaasuu u guuriyay, wuxuuna kula aqal galay qaybta ka degganaayeen qasriga Nabi Sulaymaan ee Baytu Al Maqdis**بيت المقدس,** arliga Falasdhiin**فلسطين.**
Boqoradda Bilqiis**بلقيس** waxay ninkeeda Batac**بتع** u dhashay saddex cunug oo kooda ugu caansan ahaa Wahb Il bin Batac**وهب إل بتع.**
Kitaabka Al Ikliil**الإكليل** wuxuu wariyay:
"Markaasuu Thuu Batac**ذوبتع** wuxuu ka dhalay (Kow) Asnac Yamtanic**أسنع يمتنع,** iyo (Laba) Unuuf Thaa Hamdaan**أنوف ذا همدان,** iyo (Saddex) Shams Al Sughraa**شمس الصغرى.** Hooyadoodana waa Bilqiis**بلقيس."** Waa intaas warkaan kitaabkaas kasoo qaadannay, Allaha dambigiisa dhaafee.

Xabashah**حبشة**

Wuxuu bogga saddex boqol sideed iyo soddon iyo inta ka dambaysa ku yiri:
"Duullaanka iyo guusha Reer Saba'a**سبأ** ee arliga Al Xabashah**الحبشة** – waana zamanka boqorka Yaasir**ياسر** oo Bilqiis**بلقيس** boqornimada uga dambeeyey - wuxuu sanadka sagaal boqol iyo labaatan Miilaadka hortiis ku beegmay inay degaan qabaa'il reer Yaman**يمن** ee Reer Saba'**سبأ** ahna Qaxdhaaniyiin**قحطانية** meelo badan oo ka mid ah buuraalayda Al Xabashah**الحبشة** iyo

Eritrea iyo buuraalayda Harar “ilaa meeshuu ku biyo shubo wabiga Jubba ee Soomaaliya, iyo arliga Nuubada**النوبة** ee koofurta Masar**مصر**”.

Mumtaaz Al Caarif**ممتاز العارف** wuxuu ka wariyay taariikhyaqaannada qaarkood inay Xabashah **حبشة** ahaa magaca qabiil ka mid ah qabaa’ilka reer Yaman**يمن,** oo ayada magaceedaas arliga Al Xabashah**الحبشة** loogu sammiyay, wuxuuna yiri:
“Hadaba Al Xabashah**الحبشة** waxay magaceeda ka dhaxashay mid ka mid ah qabaa’ilka reer Yaman**يمن** oo ayadaas degay..”

Culummada qaarkoodna waxay yiraahdeen:
“Erayga Al Xabashah**الحبشة** wuxuu xambaarsan yahay is dhexgal iyo isku qasan qabaa’ilka koofurta Jaziiradda Carabta**جنوب الجزيرة العربية** oo halkaas degay iyo dadka hore u degganaa oo Xaamiyiinta**حاميين** ah, markaasaa is dhexgalkaas waxaa lagu magacaabay “Al Axbaash**الأحباش**.”
Waa intaas warkaan kitaabkaas kasoo qaadannay, Allaha dambigiisa dhaafee.

Al Suhaylii\السهيلي

Al Suhaylii**لسهيلي** , oo ah Al Imaamu Abuu Al Qaasim Cabdi Al Rraxmaan bin Cabdi Allaahi bin Axmad bin Abii Al Xasan Al Khathcamii Al Ssuhaylii **الإمام أبوالقاسم عبد الرحمن بن عبد الله بن أحمد بن أبي الحسن الخثعمي السهيلي** oo la oofsaday sandka shan boqol kow iyo sideetanka hijriga kitaabkiisa Al Rawdu Al Unuf**الروض الأنف** oo uu ku sharxay kitaabka Siiratu Ibnu Hishaam **سيرة إبن هشام** (oo la oofsaday sandka hijriga eel aba boqol saddex iyo toban) wuxuu mujalladka koowaad bogga lix iyo afartan ku yiri:
“Tubbac**تبع** macnihiisu waxaa weeye “Boqorka la raacsanyahay”, boqorkana lama yiraahdo Tubbac**تبع** jeer uu ka adkaado oo xukumo Yaman**اليمن** iyo Al Sh-shixr**شحر**ال iyo Xadramuut **حضرموت\.**
Tubbaca**تبع** ugu horreeyeyna waa Al Xaarithu Al Rraa’ish ibnu Hammaal bin Thii Shadad**الحارث الرائش إبن همال بن شدد,** waxaana Al Raa’ish**الرائش** loogu bixiyay deeqsinnimadiisa isagoo dadkiisa maal ku rusheeyey.

Bogga toddobaatan wuxuu ku yiri:
“Ximyar magaciisu waa Al Caranjaj**العرنجج** afka reer Ximyarna**حمير** macnihiisu waxaa weeye “Al Catiiqu**العتيق**” (oo macnihiisu yahay “midka la xoreeyey” ama “midka qurxoon” oo erayga catiiq**عتيق** labadaas macneba waa leeyahay).”

Bogga lix iyo afartan wuxuu ku yiri:

“Saba’**سبأ** magaciisu waa Cabdu Shams**عبد شمس,** isagaana ahaa ninka ugu horreeyey oo boqorrada carabta ka mid ah oo taaj madaxa saartay.”
Waa intaas warkaan kasoo qaadannay Al Suhaylii**السهيلي.**

Sarreeye Guud Maxammad Cali Samantar

Sarreeye Guud Maxammad Cali Samantar, Madaxweyne ku-Xigeenkii hore ee Soomaaliya wuxuu aniga ii sheegay inuu ka qayb galay xafladda lagy furayay biyo xireen ay Jamhuuriyada Yaman**يمن** ee caasimaddeedu ahayd Sanca**صنعاء** intayan labada Yaman**يمن** isku darsamin ka

dhistay agagaarkuu ka dumay biyo xireenka Quraanka ku xusan Aayadda lix iyo tobnaad ee Suuratu Saba**سورة سبأ:**

فَأَعْرَضُوا فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ سَيْلَ الْعَرِمِ وَبَدَّلْنَاهُمْ بِجَنَّتَيْهِمْ جَنَّتَيْنِ ذَوَاتَيْ أُكُلٍ خَمْطٍ وَأَثْلٍ وَشَيْءٍ مِنْ سِدْرٍ قَلِيلٍ . (16)

Wuxuu yiri:
"Kun sagaal boqol iyo toddobaatannadi ayaan waxaan ka qayb galay xaflad lagu furayay biyo xireen loo bixiyay "Saddu M'arib**سد مأرب**" oo intay aad u baareen oo ay raad raaceen ka dhiseen bartuu ka dumay biyo xireenka Quraanka ku xusan oo ay ka dhiseen meel buuro u dhexeysa oo markaas biyihii la khasbay. Waxaa isaguna xafladdaas goob jog ka ahaa Mengistu Xayle Maryama oo markaas ahaa madaxweynaha Ethiopia.
Markaasaan waxaan aragnay dhagax yar oo laga soo fujiyay biyo xireenkii hore ee Quraanka ku xusan zamankii boqoraddii Yamaneed**يمن** ee Bilqiis**بلقيس** oo ay fari ku dhigantahay oo meeshaas yiillay.

Markaasuu Mengistu intuu farta dhagaxaas ku dhigan akhriyay ayuu wuxuu hadana yiri: "fartaanu ximyarida ah fartannada ayay u egtahay, oo haddaba macbadyadadeenna (waa kaniisadeheenna) fartaan ayaa wax lagu qoraa." Waa intaas warkaan kasoo qaadannay.

Hadalkaan isagoo uu Gen. Samatar hore iigu sheegay ayaan hadana waxaan ka saxday oo sugay manta oo taariikhdu tahay maalin talaado ee afarta Jamaadu Al Uulaa**جماد الآولى** kun afar boqol saddex iyo soddon Hijriga, una dhiganta toddoba iyo labaatanka Maarso laba kun laba iyo toban Miilaadiga ah, wuuna ii oggolaaday inaan warkiisa kitaabkaan ku dhigo.
Amxaarada warkeedana waxaan ku faahfaahiyay kitaabkeyga "Amxaaro."

والحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahiis faqiirka u ah,

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Minneapolis, Minnesota, USA
Maalin axad ah, ee bisha Rabiicu Al Aakhar**ربيع الأخر** tahay lix iyo labaatan ee sanadka kun iyo afar boqol kow iyo soddon Hijriga, una dhigantah kow iyo tobanka Abriil laba kun iyo toban Miilaadiga.
Waxaan hadana dib u fiiriyay oo aan masawirrada iyo macluumaad dheeri ah ku daray kana soo jeestay maalin jimce markay taariikhdu ahayd saddexda bisha Rajab**رجب** kun afar boqol shan iyo soddon, una dhiganta labada bisha Maajo laba kun afar iyo toban.

Albaabka laga galo magalaada Ma'rib**مأرب** ee arliga Yaman**اليمن**, oo caasimadda Sancaa**صنعاء** u jirta qiyaas laba boqol oo kiiloomitir, kana xigta xagga qorrax kasoo bax iyo jihada Xadramawt**حضرموت.** Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M.

Magaalada Ma'rib**مأرب**. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M.

Magaalada Ma’rib**مأرب**. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M.

Carshiga Bilqiis**عرش بلقيس** ee Ma’rib**مأرب** ee arliga Yaman**اليمن**. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M..

Carshiga Bilqiis**عرش بلقيس** ee Ma'rib**مأرب** ee arliga Yaman**اليمن.** Xasanwali Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M.

.



Anigoo taagan Carshiga Bilqiis**عرش بلقيس** ee magaalada Ma'rib**مأرب** ee arliga Yaman**اليمن.** Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M.

Siduu ahaa qasriga "Carshu Bilqiis**عرش بلقيس**. Waxaan kasoo qaadannay kitaabka "Saba' Wa Ximyar**سبأ وحمير**" juzka koowaad bogga laba boqol sagaal iyo sideetan. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M.

.

Carshiga dibaddiisa waxaa ku yaalla mawlacaan oo aan salaadda duhur iyo Casar oo aan gaabinnay iskuna darnay ku tukannay oo aan Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** ciiddaas kulul ugu

sujuudnay, meeshay dadka Bilqiis\بلقيس qorraxda u sujuudi jireen. Bilqiis\بلقيس Allaha u naxariistee waxay ku islaantay Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu hortiisa, siduu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى kitaabkiisa Kariimka ah noogu sheegay Suuratu Al Namli\سورة النمل . Markay islaantay ayuu Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu wuxuu u guuriyay, siday ayada lafteedu usoo jeedisay, ina adeerkeed boqorka Tubbac Al Akbar\تبع الأكبر oo ahaa boqorka qabiilka wayn ee Yaman\اليمن ee Hamdaan\همدان. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal\شوال 1434 H - 09/21/2013M.

Carshiga Bilqiis\بلقيس dibaddiisa waxaa ku yiillay macbad ay qorraxda ku caabudaan oo la oran jiray, sidaad looxadda ka arkaysid "Macbadu Braan\معبد بران", oo braan\بران wuxuu afkooda ku ahaa magaca qorraxda. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal\شوال 1434 H - 09/21/2013M

Kanna waa macbadkooda ay qorraxda ku caabudi jireen oo malaha hal kiiloomitir am aka yarba carshiga u jira, magaciisuna ahaa "Macbadu Awaam**معبد أوام**". Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M

Masawikaan wuxuu ku tusayaa bartay ku oolli jirtay magaalada Ma’rib\مأرب oo biya xireenku ku soo fatahay oo halligay. Waxaad u jeedana waa saqafka guryohooda oo wada duugmay oo dhulka galay. Waxayna saran tahay laamiga maanta la maro. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal\شوال 1434 H - 09/21/2013M..

Bartuu ku oolli jiray biya xireenka uu Ilaahay biyiisa kusoo rogay oo ku halaagay kuwa qorraxda caabudi jiray. Burburkaas aad u jeedid waa gees biyo xireenkaas, geeska kalena wuxuu ku yaalla dariiqa maanta la maro oo laamiga ah dhiniciisa kale, oo adiga dixdaada kaa

qabanaya oo aan masawirkaan looga jeedin. Magaaladuna kama fogayn. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal\شوال 1434 H - 09/21/2013M.

Bartaanuu ku yiillay biya xireenku, oo labadaan buurood dhexdooduu ku yiillay, biyuhuna waxay ku xirnaayeen gadaashiisa oo ah galbeed, magaaladuna waxay ku tiillay waqooyigiisa oo adiga dhabarkaaga ku aadan. Galbeedkaasna waxaa maanta ku yaalla biya xireenka cusb oo ay dawladda Yaman\اليمن dhowaan dhistay. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal\شوال 1434 H - 09/21/2013M.

Markay Ma’rab burburtay, waxay dhisteen magaalo kale oo ayadana Ma’rib la yiraado oo dhowr kiiloomitir midda burburtay. Intaas looma dhaafi karo, oo waa la ilaaliyaa inay wax gaaraan oo intay ruxmaan ay wax kasoo dhacaan baabuurta maraysa daraadood. Siday u egtahayna waxaad ka arkaysaa masawirka hoose oo aan kasoo qaadannay kitaabka la yiraahdo “Ak-Jouf – Marib – Shabwa” ee ay soo saartay Wasaardda Hiddaha iyo Dhaqanka Hay’adda Dalxiiska ee Dawladda Yaman**اليمن**, kuna dhigan afka jarmanka. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal**شوال** 1434 H - 09/21/2013M.



Magaalada la dhisay burburka tii hore dabadeed oo aad u jeedid inay guryuhu dabaqyo la is kor saaray ka dhisan yihiin, oo dhoobo laga wada dhisay. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal\شوال 1434 H - 09/21/2013M.

Anigoo taagan dusha biyo xireenka “Saddu Ma’rib Al Jadiid**سد مأرب الجديد**” oo ka dambeeya oo dhowr kiiloomitir u jira kii hore. Xasanwali Sabti 15 Shawwaal\شوال 1434 H - 09/21/2013M.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi

badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh. Kaddib wuxuu ku dhigay ”Siirada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam” toddoba iyo labaatan mujallad. Kaddibna kitaabkaas Siirada ayuu lix mujallad isugu keenay una bixiyay ”Nuurka Quluubta Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.” Wuxuuna allifay kutubbo kale oo ay ka mid yihiin ”Haweenka iyo Caruurta Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam”; iyo ”Qisooyinka Anbiyada”; iyo ”Taaruukhda Makkah Al Mukarramah iyo Masawirradeeda” oo hal mujallad; iyo ”Ziyaaro Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam” iyo taariikhda Al Madiinah Al Munawwarah iyo Masawirradeeda oo hal mujallad ah. Wuxuu kaloo allifay kutubbo ku dhigan afka ingiriiska oo Siiro, Axkaam iyo taariikhba leh.
Hadda wuxuu ku nool yahay dalka maraykanka, Allaha ku ilaaliyee.